

In ka badan 1.5 malyuun ruux oo joogta Soomaaliya ayaa weli ku sugan xaalad cunno yari ba'an ama kasii liidata 903 100 caruur ah ayey u badan tahay nafaqo darri heyo

Bishii 2aad 3, 2019, Muqdisho/Washington – Saameynti roobabkii xilligii Deyrta (Bilihii 10aad-12aad) ee caadiga ka hooseeyey iyo dadkii badnaa ee ay barakiciyeen abaarihii 2016/2017 iyo colaadihii ba'naa ee lasoo maray, in ka badan 1.5 malyuun ruux ayaa lafilayaan inay ku sugnaadaan cunno yari ba'an (Crisis IPC Phase 3)¹ ama kasii liidata ilaa laga gaadho Bisha 6aad 2019. Waxaa taa wehlisa, marka la firiyo xogtii laga helay kormeerkii xilli Deyreedkii Bilihii 11aad-12aad 2018 ka dib, 903 100 caruur ah oo ka yar shan-sano ayaa loo badinayaa in nafaqo darri ba'an ku habsato sanadka 2019. Dadka xoolo-dhaqatada ayaa la kulmi doona biyo iyo xoolo aan iibsamayn, Meesha beer-xoolo-dhaqatada ay goosan doonaan dalag ka yar intii sida caadiga ah ay goosan jireen Deyrta. Ilaa iyo Bishii 1aad, mucaawino ballaaran oo joogto ahayd ayaa ka horjoogsatay in xaaladda sugnaanta cunnada ay ka sii darto meelo badan oo dalka ah. Saadaasha roobabka Guga (Bisha 4aad-Bisha 6aad 2019) oo caadi ah iyo xaaladda ganacsiga oo ballan qaad wanaagsan leh ayaa la filayaa inay wanaajiyaa xaaladdi sugnaanta cunno ee kasii xumaani lahayd illa bartamaha 2019ka. Kormeer xilliyeedkan waxaa si wadajir ah u hogaaminayey waxaa horkacayey Heyadda Falanqynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Soomaaliya (FSNAU, waa mashruuc ay maamusho Heyadda Dhuuniga iyo Baeraha ee Qaramada Middobay FAO), iyo heyadda Wada-shaqeynta Nidaamyada ka Digista Macaluuusha (FEWS NET, oo ah mashruuc ay maalgeliso USAID) waxaa iyana si xooggan ka qeyb qaataay wasaaradaha dawladda iyo kuwa wada shaqeyntu naga dhhexeyso.

Sadaashii heshiiska lagu ahay ee la baahiyey Bishii 8aad 2018 oo ay soosaartay Bahweyn Geeska Afrika ee Saadashaa Cimilada IGAD-ICPAC (GHACOF50), oo saadaalinayey in aad ay ugu badan tahay in roobabka Deyrta 2018 ay noqon doonaan kuwo caadi ah ama ka sii fiican ayaaan sidii noqonin. Roobabkii Deyrta waxay billabmeen goor dambe aadna wey uuga yaraayeent sidii caadiga ahayd waddanka intiisa badan, weliba bartamaha Soomaaliya inteeda badan iyo meela ka mid ah woqooyiga Soomaaliya ayaa helayey 25-50 boqolkiiba robabkii caadiga ee ay heli jireen. Wax fatahaad roobeed amd webi oo lasoo sheegay ma jirin. Biyo iyo baad qalalan oo Gugii (Bishii 4aad-6aad) laga dhaxlay iyo keyd ka haray firidii Guga oo waxsoosaarkiisa ka sarreyay intii caadiga ahayd ee la goostay Bishii 7aad, ayaa dabciyey dhibkii ka iman lahaa roobakii Deyrta ee liitay. Si kastaba ha ahaatee, xaaladda biyaha iyo baadkaba wey ka liitaan caadigii qeybo ka mid ah habnololeedyada Xoolo-dhaqatada Woqooyi, xoolo-dhaqatada Hawdka ee woqooyi, iyo xoolo-dhaqatada Caddunka ee Bartamaha Soomaaliya, waxa sidoo kale ah beer-xoolo-dhaqatada koonfureed ee gobolka Hiiraan. Wuxa dhibka ugu weyn ku haya habnololeedyada xoolo-dhaqatada woqooyi iyo bartamaha dalka waa biyo la'aanta oo iyadu horseedday biyo dhaamis qaali ah inuu billowdo goor hore, waana xaalad la filayo inay kasii darto xilliga Jiilaalka (Bisha 1aad-3aad) inta aanu roobabka Guga billaabmin oo xaaladdu si tartiib ah uga soo rayn doonto ee Bisha 4aad. Inkastoo guurguruka xoolaha oo caadiyahay wadaanka oo idil, xoolaha jooga gobollada dhexe waxaa inay guuraan iska hortaagay colado madani ah oo ka cusboonaaday deegaannadaasi.

Xoolihii rimay xilliadii lasoo dhaafay ayaa dhalay Deyrtan, deedna waxaa si caadi aha ama ka hooseysa u soo fiicnaaday helitaankii caanaha ee gobollada woqooyiga iyo bartamaha, waxay iyana si caadi ah ama ka sareysa usoo kordheen gobollada koonfureed ee Somaaliyeed. Madaama qiimaha neef ari' ah uu gooyo in ka badan hal kiish (50Kg) oo firi ah, isku beddeleshada neefka-ayo-firida waxay ahaan doontaa mid guud ahaan waxtar leh. Balse gobollada woqooyi iyo bartamaha, oo xoolo badan ku baaba'een xilligii abaaraha ee 2016/2017, heysahada xoolaha iibsamii kara ayaa weli sii yar, ayaa ciriiryeysa awoodda reeraha saboolka ah sidii ay ku quudin lahaa yeen qoysaskooda una iibsan kari lahaayeen biyhii xoolaha.

Waxsoosaarka firida ee Deyrta 2018 ee koonfurta Soomaliya ayaa lagu qiyasay 76 600 tan, ooy ku jiraan 4 500 tan oo ah inta la goosan doona dabayaqaada Bisha 2aad/3aad, oo ah boqolkiiba 22 ka ka yar celceliska muddada dheer ee 1995-2017. Dhinaca Woqooyi-galbeed, waxsoosaarkii beeraha ee Guga/karanta ee lagoostay Bishii 11aad ayaa lagu qiyasay 11,000 tan, kaasoo ah boqolkiiba 72 ka hooseeya celceliskii waxsoosaarka Deyrta ee 2010-2017 wuxaana sababay roobabka oo liitay dhibka cayayaanka iyo shimbiraha oo badnaa.

Xogta laga helay kooxda sugnaanta cuntada ee Soomaaliya ayaa muujineysa in gurmadi mucaawino cunno oo ballaaran ay ka jirtay guud ahaan Soomaaliya oo idil, gareenna 1.8 to 2 malyuun oo dad ah bishiiba intii u dhixeysay bilihii 8aad ilaa 12aad 2018, deedna middani waxay horjoogsatay in xaaladda sugnaanta cunnada ee meelo badani ay kasii darto. Taasi waxay horseeday, inta badan reer miyiga woqooyiga Soomaaliya in hadda lagu asteeyo xaalad cunno Ciriiri ah (IPC Phase 2!) mucaawinada ka jirta awigeed, halka habnololeedka xoolo-dhaqatada Gubanka ay iyagu hadda ku asteysan yihiin xaalad Ba'an (IPC Phase 3!).

Qiyaastii 2.6 malyuun ruux oo Soomaaliya oo dhan ah ayaa weli dalka gudihiisa ku barakacsan, oo ama kudhex milan bulshada ay la noolyhiin ee miyiga, ama ku nool deegaamo loo aqoonsanyaay ama iska-deg ah oo ku yaalla duleedyada magaalooyinka. Natijadii kormeerkii Deyrta ka dib Post-Deyr ayaa muujinaysa in 14 ugu waaweyn deegaamada barakcayaasha intoda badan ay ku suganyihiin xaalad cunno yari Ba'an (IPC Phase 3) ama Ciriiri! (IPC Phase 2!) xagga cunno helidda mucaawinada ay helayeen awigeed. Magaalooyinka intooda badan, sicirka cunnada ee sii dhacaya ama aan is beddeleyn iyo fursadaha shaqo ayaa caawiyay in xaaladdooda sugnaanta cunnada ku sii ngaato xaalad Ciriiri (IPC Phase 2) ah ama Dhib-yari (IPC Phase 1) ah. Balse, qoysaska reer magaalka ee gobollada Awdal iyo Sool ayaa cunno yari ka jirtaa oo lagu asteeyay cunno yari Ba'an (IPC Phase 3), ooyna keentay sicirka maciishadda oo sarreyya iyo lacagtii waddanka oo qiimi jab ku dhacay.

Jiilaal kulul oo soosocda, Midowga Dawlad-goboleedyada Mareykanka Maamulidda Badaha iyo Hawada Qaranka Xaruntooda Saadaasha Cimillada (NOAA/CPC) sadaashooda muddada fog ayaa muujineysa in sida loo badinayo in roobabka Guga (April-June) 2019 ay noqon doonaan kuwo caadi ah Soomaaliya oo idil, marka laga reebo xeebaha gobollada Shabeelooyinka iyo Jubbooyinka oo iyagu laga yaabo in Bisha 5aad anay roob helin. Waxay horseedeyso, inay wanaajiso helitaanka biyaha iyo baadka, tacabka beeraha, helista shaqooyinka beeraha, iyo in sicirka biyaha iyo cunnada raqiisaan illaa dhammaadka muddadan saadaasha ee inta u dhaxeeysa Bilaha 4aad iyo 6aad 2019.

¹ Heerarka Asteenta Sugnaanta Cuntada (IPC) waa xirmo aalad iyo dariiqooyin si cayimo heerarka dhibaatada cunno yarida iyadoo la adeegsnayo shanta-heer qiyasee: IPC Phase 1=Dhib yari; Phase 2=Ciriiri; Phase 3=Ba'an; Phase 4=Gurmadi; and Phase 5=Macaluuul oo heer deegaan ah (Phase 5=Halaag heer koox qoyseed).

Sugnaant Cunnada ayaa la filayaa inay xumaato qaybo ka mid ah woqoyiga iyo bartamaha Soomaaliya laga billaabo Bisha 2aad illaa Bisha 6aad 2019. Habnololeedyo badan oo beer-xoolodhaqato iyo xoolo-dhaqato ah ayay sii xumaan doontaa oo ku astoobi doon xaalad cunn yari Ba'an (IPC Phase 3) inta u dhexeysa Bilaha 5aad iyo 6aad, oo ah marka roobabka Guga billaabmaan in waxtarkooda wanaajiyaa caanaha iyo hilibka xoolaha, dhalmada xoolahana sii kordhisoo xoolaha iibsami kara, fursadaha shaqada beerahana kordhaan. Haddii mucaawanada Meesha ka baxdo, natijijada sugnaanta cunnada habnololeedka Xoolo-dhaqatada Gubanka ayaa la filayaa inay ka darto ooy noqoto heer Gurmad (IPC Phase 4), heer cunno yari Ba'an (IPC Phase 3) ay noqoto Beer-xoolodhaqatada Woqooyi, Xoolodhaqatada Cadduunka ee gobollada bartamaha, Xoolo-dhaqatada Woqooyi, Xoolo-dhaqatada Golista Bari ee gobolka Sanaag, Hawdka Woqooyi Galbeed, Beer-xoolo-dhaqatada koonfureed ee gobolka Hiiraan iyo Beer-xoolo-dhaqatada xoog-yar ee Baay-Bakool. In ka badan 1.5 malyuun ruux ayaa kusoo fool leh cunno yari Ba'an Crisis amaba ka sii daran (IPC Phase 3 ama ka sarreysa) inta la gaarayo Bisha 6aad 2019. Waxaa iyana 3.4 malyuun ruux ayaa ku astoobaya cunno yari Ciriiri (IPC Phase 2) ah, taasoo tirade wadarta guud ee dadka Soomaaliya jooga ee cunno yari daran ku sugar illaa bartaha 2019 noqoneysaa 4.9 malyuun. Kuwa ku sugar sugnaanta cunno yari Ba'an (IPC Phase 3) ama kasii xun ayaa si degdeg ah ugu baahan gurmad kaalmo bani'aadminnimo illaa Bisha 6aad 2019 si looga hortago inay xaaladda kasii darto. Taageero habnololeed ayay kaloo u baahanyihiin dadka ku asteysan cunno yari Ciriiri ama kasii liidata (IPC Phase 2 ama ka sarreysa).

Natijjada 38 sahan oo xalaadda nafaqada oo ay qabateen Hayadda FSNAU iyo hayadaha ay wada shaqeeyaan bilihii 11aad iyo 12aad 2018 ayaa muujinaysa in xaaaladda guud ee nafaqadu ay soo ladnaanayso sababo la xiriira sugnaanta cunnada oo fiicnaatay, cudurro dilaacyadii sida shuban-biyoodka oo yaraaday iyo joogtaynta adeegyada gargaarka. Celeliska xaaaladda nafaqo darrida ayaan isbeddelin iyadooy ugu wacneyd heerka cudurrada oo yaraa iyo joogteyn taageerada mucaawinada la xiriirta nafaqada iyo caafimaadka. Bar-dhexaadka dhacdooyinka Nafaqo Darrida Caalamiga (GAM) Ayaan iska beddelin heer Ba'an (10-14.9%) seddexdii xillili ee la soo dhaafay (12.6% Deyrtan 2018, 14.0% Gugigii 2018 iyo 13.8% Deyrtii 2017). Si kastaba ha'ahaate, Xaalad Nafaqodaro sare ayaa weli ka jirata deegaano badan oo Soomaliya ah, iyadoo oo loo aneynayo xaalado ay ka mid yihiin sugnaanta xaalddada cunta oo weli liidata, cuduro badan, talaalka iyo siinta Vitamin A caruurtta la siyo oo weli yar iyo tabaha quidinta dhalaanka oo liidata. Nafaqo darri aad halis u ah (SAM) oo heer Halis ($\geq 4-5.6\%$) ah ayaa lagu arkay habnololeedka xoolo-dhaqatada koonfureed ee gobolka Bakool. Heerka dhimasha guud ayaa ah mid Halis (1 to $<2/10\ 000/\text{maalintii}$) ah xoolo-dhaqatada Golista Galbeed iyo xoolo-dhaqatada Hawdka ee woqooyi galbeed, halka xadiga Cudurrada ay weli yihiin kuwo aad u srreeyo ($>20\%$) carruurti la soo wareestay. Xaalada nafaqada ee dagaanada xoolo-bero-dhaqatada masagada xooggan ee gobollada Baay iyo Shabeellooyinka, beer-xoolodhaqatada koonfureed ee gobolka Hiraan ayaa loo badinayaa in nafaqo darridooda ay kasii xumaato keerka Ba'an ooy noqoto mid Halis ah laga billabo Bisha 2aad ilaa Bisha 4aad 2019. Daaweyn degdeg ah iyo taageero nafaqo ayaa u baahan tiro lagu qiyaasay 903 100 carruur ah oo 5-sano jir ka yar (wadarta culeyska nafaqodarrida) oo laga yaabo inay sii nafaqo darraadaan illaa iyo Bisha 12aad 2019, ooy weliba wehliyan 138 200 oo laga yaabo inay Nafaqo darri aad halis u ah (SAM) ku dhacdo. Waa in kaalmooyin wadajira la joogteyaa si loo xoojiyo kasoo kabasho iyo in hakiyo in xaaladda nafaqada kasii darto.

Meelaha iyo Dadka Laga Walaacsan Yahay

Kooxaha dadka ee lagu asteyay cunno yari Ba'an (IPC Phase 3) ama kasii xun ayaa u baahan kaalmo ujeedkeedu yahy si loo yareeyo helitaan yarida cunnada, baabi'inta nafaqodarrida, badbaadinta nolosha iyo ilaalinta iyo keydinta habnololeedyada.

Gobollada	Tirada Dadka Ku Nool (2014 Qiyaasta)	Tirada Dadka ku Sugan Cunno Yarida Daran (Bilaha 2aad-6aad, 2019)		
		Cunno Yari Ciriiri ah (IPC 2)	Cunno Yari Ba'an (IPC 3)	Xaalad Deg-deg ah (IPC 4)
Awdal	673,264	195,000	142,000	31,000
Woqooyi Galbeed	1,242,003	480,000	192,000	14,000
Togdheer	721,363	283,000	123,000	6,000
Sanaag	544,123	245,000	116,000	1,000
Sool	327,427	133,000	100,000	-
Bari	730,147	264,000	113,000	7,000
Nugaal	392,698	99,000	39,000	-
Muduq	717,862	220,000	84,000	-
Galgaduud	569,434	205,200	45,000	2,000
Hiraan	520,686	101,000	54,000	-
Shabeellaha Dhexe	516,035	69,000	12,000	-
Shabeellaha Hoose	1,202,219	109,000	26,000	-
Banaadir	1,650,228	537,000	99,000	50,000
Baay	792,182	147,000	176,000	12,000
Bakool	367,227	59,000	19,000	-
Gedo	508,403	54,000	24,000	5,000
Jubbada Dhexe	362,921	69,000	6,000	-
Jubbada Hoose	489,307	123,000	46,000	11,000
Wadar Guud	12,327,529	3,392,200	1,416,000	139,000

Deegannadan ayaa laga walaac qabaa oo loo arkay in ay yihiin meel aad dhibban oo u baahan in gaar degdeg ah ay adeegyo nafaqo iyo caafimaad u helaan. Deegaanadaasi waa kuwa heerkooda nafaqdarda guud ay ka sareyso ($\geq 15\%$ GAM) or ≥ 10.7 boqolkiiha oo caruur ah oo cabirkha wareegga bartamaha jintooda (MUAC) ay ka yartayah 125 millimitir. Degaannadaas oo kala ah: xoolo-dhaqatada Gubanka, Xoolo-dhaqatada Woqooyiga, Xoolodhaqatada Golista bari, Degmada Beletweyne (Beer-xoolo-dhaqatada koonfureed) Xoolo-dhaqatada koonfureed ee gobolka Bakool, Beer-xoolo-dhaqatada masagada ee xoogan ee gobollada Baay ee Shabeellooyinka, iyo weliba barkacayaash ku nool Magaalaooyinka Qardho, Muqdisho iyo Baydhabo.

FSNAU iyo FEWS NET waxay sii wadi doonaan indho ku heynta xaaladaha iyo iyo kasoo baxa iyo ka warbixinta xaaladda. Xogaha oo dhami waxaad ka heli kareysaan baraha www.fsnaau.org iyo www.fews.net. Wixii xog ah ee dheeri ah, fadlan kala xiriir: Lisa Ratcliffe, Madaxa Isgaarsiinta, FAO Somalia, Tel: +252 613 382 539/+254 741 068 834, Email: isa.ratcliffe@fao.org and Marie Maroun, Madaxa Isgaarsiinta, Famine Early Warning Systems Network (FEWS NET), Tel: +1 202 524 7749, Email: mmaroun@fews.net

